
# Noqo doorasho tebiye xirfad leh



HAGAHA WARFIDIYEENKA
EE TEBINTA DOORASHOOYINKA
SOMALILAND 2017

# TUSMADA

CHAPTER


| | | |
|---|---|---|
| | HORDHAC: TEBINTA DOORASHOOYINA SOMALILAND 2017 – NOQO XIRFADLE | 3 |
| 1 | NIDAAMKA DOORASHOOYINKA SOMALILAND | 5 |
| 2 | DOORKA IYO MASUULIYADAHA WARFIDIYEENKA | 6 |
| 3 | QORSHEYNTA TEBINTA DOORASHADA | 8 |
| 4 | SUMCADDA WARFIDIYEENKA: RUNTA RAADI MAR WALBA OO NOQO CAADIL DHEXDHEXAAD AH | 11 |
| 5 | RAAC HABRAACYADA XIRFADDA EE LA ISLA OGOL YAHAY | 14 |
| 6 | SIDA LOO XAKAMEEYO HADALLADA NACEYBKA IYO RABSHAD ABUURKA KU SALEYSAN | 18 |
| 7 | ANSHAXA TEBINTA DOORASHADA | 22 |
| 8 | DEJINTA QODOBO HAGA HAWLWADEENADA SOO TEBINAYA DOORASHOOYINKA | 23 |
| 9 | BADQABKA WARFIDIYEENKA TEBINAYA DOORASHOOYINKA | 24 |

# TEBINTA DOORASHOOYINA SOMALILAND 2017 – NOQO XIRFADLE

Ma jirto wax qofka wariyaha ah uga muhiimsan in uu tebiyo doorashada heer qaran ee dalkiisa. Mustaqbalka horumarineed ee dalkaaga ayaa dhabbe cusub qaadaya: Dhabbe noocee ah ayaad dooneysaa Soomaliland inay qaaddo?

Haddii aanu nahay warfidiyeenka waa in aanu sameynaa dadaal weyn si aan ugu adeegno dadkeena, oo aan u sameyno wargelin wanaagsan, kuna dhiirigelino ka qeyb galka iyo in ay fahmaan waxa ay doorasho tahay.

Doorasho xor ah, taas oo bulshada oo dhami ay dareemeyso in lagu matalay, waxay fure u noqoneysaa horumar ku dhisan nabad iyo dimoqraadiyad.

Warfidiyeen ahaan waxa ina saaran masuuliyad ka weyn oo ka qoto dheer midda ay ina saareen mulkiilayaasha warbaahinteena. Waxaa ina saran masuuliyad ah in aan ka qeyb qaadano dhiirigelinta iyo taageeridda horumar ku saleysan hanaan dimoqraadiyadeed ku dhisan xoriyatul qawl. Tiirka ugu muhiimsan xoriyatul qawlka waa tebin run ku saleysan, taas oo lagu dhaliili karo dhammaan awoodaha ugu sarreeya dalka.

Soomaaliland iyo dalalka kale uu soo maray dagaallo ayaa dadku waxaa ay inta badan ka aaminsan yihiin in warbaahintu ay afhayeen u tahay dowladda iyo awoodaha kale ee dalka ka jira. Waa masuuliyad laga rabo qofka warfidiyeenka ah wiil ama gabadh in uu muujiyo in uu yahay qof la aamini karo oo aan koox u adeegeyn, oo si dhexdhexaadnimo ah u tebinaya doorashooyinka.

Soomaaliland gudaheeda in wariye la noqdo waa hawl adag. Waxaa ay xitaa noqon kartaa mid halis badan kuu keenta haddii aan la raacin talooyin kugu haga badqabka.

Xasuuso in warfidiyeenka xaquuqdooda lagu damaanad qaaday qodobka 32-aad ee dastuurka Somaliland, Xeerka Saxaafadda Somaliland (Xeer No. 27/2004) iyo qodobka 19-aad ee baaqa caalamiga ah ee xaquuqda aadamaha, kaas oo ay saxeexeen 154 dal oo dunida ah. Xaquuqaadkaas waxaa kale oo lagu damaanad qaaday qaraar gobaleedyada xaquuqul insaanka ee Afrika, Qaaradda Ameerika iyo Yurub.

Heshiishyadan waxaa ay aqoonsanayaan xaqa weriyaha ee ah in uu war raadiyo, helo, isla markaasna faafiyo si xor ah oo aanay farogelineyn dowladdu. Saraakiisha dowladda waa in aanay handadin, cabsi gelin, ama hawshooda ka horjoogsan warfidiyeenka inta ay hawlahooda ku guda jiraan, si ay u gutaan masuuliyaddooda. Dowladdu waa in aanay warfidiyeenka faafreebid ku sameyn amaba si dadban ugu cadaadin adeegyada ay uga baahdaan.

Talooyinka ku qoran buuggan waxaa ay warfidiyeenka Somaliland u fududeynayaan in ay qaataan go'aanno sax ah marka ay doorkooda iyo masuuliyaddooda shaki ka galaan iyo in ay fahmaan sida ay ku helayaan macluumaadka iyo xogaha doorasho.

**Buuggan waa tusmo ee ma soo bandhigayo xaqiiqooyin, warfidintuna ma ahan cilmul saynis. Warbaahintu waxaa badanaa looga doodaa arrimaha taagan sax iyo qalad, dunida oo dhan warfidiyeenku waxaa ay sida asaasiga ah tixgeliyaan mabaadii' xirfadeed iyo kuwo anshax oo isku mid ah.**

Mabaadii'daad guud ee la isla ogol yahay ayaa gundhig u noqonaya buuggan.


# 1 NIDAAMKA DOORASHOOYINKA SOMALILAND

Dastuurka Somaliland wuxu qeexaya nidaamka siyaasadeed ee Somaliland inay ku salaysantahay qaab dhismeed dimuqradii ah oo ah nidaamka xisbiyo badan, iyadoo madaxweynaha, golaha baarlamaanka iyo golayaasha degaanka ee shacabku sii toos ah uu dooranayaan iyagoo adeegsanaya codkooda

Dastuurka Somaliland wuxu xadiday tirada xisbiyada ee uu tartamaya doorashooyinka qaranka oo lagu koobay saddex xisbi. Hadda xisbiyada uu tartamaya doorashooyinka soo socda waa xisbiga KULMIYE, xisbiga WADANI iyo xisbiga UCID iyagoo xisbi walba igmaday musharax uu tartama doorashada Madaxweynaha

Doorashadu wuxu ahaanaya mid ‘hal qof hal cod ah’ iyadoo Komishanka Doorashooyinka Qaranka (KDQ) ee Somaliland dalka oo dhan ka fuliyey diiwaangelinta codbixiyaasha iyo qaybinta kaadhadhka codbixinta doorashooyinka.

Codbixiyaasha is diiwaangeliyey ee qaatay kaadhadhka codbixinta doorashada ayaa codeenaya oo dooranaya Madaxweynaha Somaliland.



# 2 DOORKA IYO MASUULIYADAHA WARFIDIYEENKA

Marka ay timaaddo in doorasho la tebiyo waxaa aad muhiim u ah in uu cad yahay doorka wariyaha iyo warbaahinta.

Wariye kasta ee doorasho tebinaya waxaa saaran masuuliyad shaqsi ah iyo mid mihnadeed, taas oo uu ku xaqiijinayo in uu u dhaqmo si masuuliyad dhab ah xambaarsan oo waafaqsan heerarka caalamiga ah.

Culaysbadan ayaa saaran warbaahinta xilliga doorashada. Siyaasiinta qaar iyo danaha xoogan ee xaga danbe ka riixaya waxay sameyaan si walba ee ay doorashada ugu guuleysan karaan, sida in ay laaluush bixiyaan ama been sheegaan iwm. Siyaasiinta qaar ayaa isku dayaya in ay adeegga warbaahinta iibsadaan (Laaluushaan), waxay dhaqaale ku bixiyaan in xayeysiintooda siyaasadeed sida war loo tebiyo.

Laakiin haddii aanu nahay warfidiyeenka waa in aan noqonaa kuwo ka madax banaan siyaasiinta isla markaana lacag kuma qaadan karno war la xidhiidha doorashada oo aan tebineyno. Taasi waxaa ay dhaawaceysaa sumcaddeena iyo madax banaanida xirfaddeena.

Xitaa haddii ay warbaahinta aan ka shaqeyno ay u janjeedho xisbi siyaasadeed gaar ah anaga warfidiyeen ahaan waa in aan ku faro adeygna in aan dhexdhexaad u noqonno dhammaan xisbiyada siyaasadda, waana in fikirkeena shaqsiyadeed ee siyaasadda la xidhiidha saameyn ku yeelan warka aan tebineyno. Tani waa mas'alo fudud oo la xidhiidha anshaxa aasaasiga ah ee wariyenimada iyo xirfad wanaagga.

Si kastaba ha ahaatee, wariyeyaasha u shaqeeya warbaahinta sida adag loo maamulo waxaa ay badanaa la kulmaan cadaadis dhanka soo saaridda wararka, taas oo keeneysa in aysan marka fikradahooda ku mili karin wararka ay tebinayaan. Wariyeyaashan waa kuwa dhexdhexaadnimadooda sugan tahay.

Caadiyan, war tebinteenu waxaa ay raaceysaa talo soo jeedinno badan oo ee sameyaan hay'adaha xaquuqul insaanka, kuwaas oo dhiirigelinaya in tebinta doorashada ay dhiirigeliso oo fududeyso afkaarta xorta ah, isla markaana la hubiyo in aan tixgelin gaar ah la siin dowlad am cid kale.

Doorkeena ugu muhiimsan waa in aan muwaadiniinta Somaliland fahamsiino arrimaha muhiimka ah ee furaha u ah doorashada si ay ugu fududaato in ay gaadhaan go'aanka ugu habboon ee qofka ay u codeynayaan. Sidoo kale in aan barno jilayaasha siyaasadda, qorshayaashooda hawleed, kuwa siyaasadeed iyo saameynta siyaasadahooda. Waxaan uga jawaabeynaa: Waa kuma musharraxan siyaasadeed? Musharraxa ma leeyahay sooyaal waxqabad oo wanaagsan?  Musharraxa ma yahay mid ay bulshadu aamini karto mise waa qof musuqmaasuq yaqaana?

**TIXGELI SU'ASHAN MARKA AAD GO'AAN KA GAADHEYSO DOORKAAGA XIRFADEED EE WARIYENIMADA:**

## Warbaahintaada ma leeyahay wax masuuliyad dimoqraadiyadeed ah ama masuuliyad ka saaran in ay caawiso xaqiijinta horumar lataaban karo inay ka hana qaado Somaliland?


Haddii aad su'aashan jawaabteeda isu siin kartid 'Haa' xasuusnow in doorkaaga wariyenimo ee tebinta doorashada ay tahay sidan soo socota:

★ **Waxbarid:** In aad wargeliso oo aad barto muwaadiniinta Somaliland hab socodka doorashada iyo muhiimadda uu leehahay danaha qaranka.

★ **Sugnaan:** In aad tebintaada ka dhigto mid sugan, dhexdhexaad ah, oo aan dhinacna u xaglineyn.

★ **Dhexdhexaad:** In aad noqoto qof u dhexaaya siyaasiinta iyo cod bixi-yeyaasha isla markaasna xaqiijiso inay is dhegeystaan.

★ **Muwaadiniinta:** In aad xaqiijiso in muwaadiniinta Somaliland ay dareemaan in warbaahintu ay si wanaagsan u daboosha danahooda dhanka doorashada iyo ololayaasha.



# 3 QORSHEYNTA TEBINTA DOORASHADA

Qorsheyntu waa hab aad u wanaagsan haddii aad dooneyso doorasho tebin tayo wanaagsan leh, waana in aad hore uu qorsheysa oo aanad orordin marka lagugu wargeliyo in uu dhacay shir jaraa'id. Qorsheynta tebinta doorashada waa tallaabooyin badan oo muhiim ah in la qaado ka hor inta aan la billaabin ololayaasha doorashada iyo doorashada qudheeda:

## DIYAARSO UJEEDDOOYINKA AAD DOORASHADA U TEBINEYSO

Haddii aanad aheyn wariye madax banaan oo iskii u shaqeysta, oo aad ka mid tahay koox wariyeyaal ah oo warbaahin u wada shaqeeya waa in aad mar hore billowdaan qorsheynta iyo dejinta ujeeddooyin cad oo ay ku qeexan yihiin sida ay warbaahintaada dooneyso in ay u tebiso doorashadan. U diyaarso ujeeddooyinka si taxadar leh oo ay aad uga wada shaqeeyeen tifaftirayaasha iyo wariyeyaasha, qor oo daabac ujeeddooyinka kaddibna ha helo qof walba oo ka mid ah kooxda loo diyaariyey soo tebinta doorashada iyo xubin walba oo tifaftirayaasha ka mid ah.

In ujeedooyin la qorto waa hab raac muhiim ah, waayo ujeeddooyinka qoran waxaa ay ka caawinayaan tifaftirayaasha iyo wariyeyaasha in ay si sax ah uga fikiraan sida ugu wanaagsan ee ay u qorsheyn karaan una fulin karaan habka ugu wanaagsan ee ay doorashada u tebinayaan halka ee sugi lahaayeen dhacdooyin dhaca.

Ujeedooyinka qoran waxaa ay kugu cawinayaan in aad u adeegsato jiheeye ahaan, waxaa ay kugu jiheynayaan habka ugu wanaagsan ee aad doorashada u tebineyso inta ay socdaan ololayaasha xasaasiga ah iyo doorashadaba. Toddobaadkiiba hal mar waa in adiga iyo saaxiibadaada shaqada aad dib u eegis ku sameysaan ujeeddooyinka idin qoran si aad u hubisaan in tebintiina doorashada ay ku socoto dhabbe sax ah.

## XULASHADA ARRIMAHA QUSEEYA MUWAADINIINTA NOLOSHOODA

Xasuusnow ereyga 'Politics' oo la macne ah siyaasad waxaa uu asalkiisa ka soo jeedaa afka Giriiga, waxaana loola jeedaa 'Danta dadka'. Doorasho walba waxa ugu muhiimsani waa siyaasigee ay dadku rabaan in uu hoggaankooda ka mid noqdo. Tani macnaheeda wuxuu yahay, doorashadu waxaa leh muwaadiniinta wax dooranaya ee siyaasiinta la dooranayo ma leh, danaha la matalayo waa kuwa dadka, iyaga ayaana ahmiyadda leh.

Sidaas darteed, waajibaadka wariyaha xirfadlaha ee doorasho tebinaayo waa in uu soo bandhigaa baahiyaha muwaadiniinta iyo sida ay ay doorashada uga jawaabeyso: Maxay yihiin arrimaha sida weyn u khuseeya muwaadiniinta? Sida iska cad dadweynuhu waxaa ay doonayaan in warbaahintu ay ka haqab tirto wararka la xiriira hab socodka doorashada iyo meesha ay wax marayaan. Waa in dadweynaha ay warbaahintu bartaa xaquuqdooda iyo shuruucda hageysa doorashada.

Tebinta doorashada waa ay ka muhiimsan tahay in dadka la baro sida ay wax u socdaan. Ma jiraan wax xog uruurinno ah oo la soo bandhigay oo ka jawaabaya baahiyaha aasaasiga ah ee dadweynaha, warfidiyeenka ma ka helaayaan xogtaas ilahooda wararka, mase dareemayaan jiritaanka baahiyaha aasaasiga ah? Diyaarso liis ay kuugu qoran yihiin baahiyaha aasaasiga ah ee muhiimadda weyn u leh bulshada Somaliland, si aad u tebiso wixii baahiyahaas la xidhiidha ee doorashada lagu soo bandhigo ama aad siyaasiinta xil doonka ah u weydiiso su'aalo la xidhidha waxa ay ka qabanayaan.

Waxaa aad qof waydiin kartaa baahiyahan dadweynaha muhiimka u ah qeyb ma ka yihiin hanaanka doorashada? Haa, siyaasad macnaheedu waa nolosha dadweynaha ama muwaadiniinta: Badqabkooda, ammaankooda, caafimaadkooda, dhaqaalahooda, guryeynta, biyaha, waxbarashada iwm.

Waxa aad xulan kartaa oo aad soo bandhigi kartaa warbixinno iyo barnaamijyo ku saleysan baahiyaha muhiimka u ah dadweynaha oo aad xirfad sare ku diyaarisay. Tani macnaheedu waa in aanad sugin in ay dhacaan shir jaraa'idyo ama ay soo baxaan warsaxaafadeedyo. Waa in aad noqotaa xirfad leh hal abuur leh oo warbixinno ku saleysan baahiyaha dadweynaha diyaarsan kara.

## XASUUSNOW IN AAD WARAR IYO WARBIXINNO U DIYAARISO BARAHAAGA BULSHADA

Qorshaha ku darso in aad tebintaada ku gudbiso qalabkaaga warbaahinta ee caadiga ah: Sida wargeys, Muuq baahiyaha, Raadio-ga ama degelka internet-ka. Waxaa aad sidoo kale – Haddii aad ilo wareed wanaagsan heleyso – abuuri kartaa warbixinno ay dadka ka aqristaan barahaaga bulshada sida Facebook, Twitter, Youtube, Tumblr, Instagram iwm iyaga oo adeegsanaya taleefoonadooda ama aalado la mid ah, Badanaa waqti badan ma qaadaneyso in bulshada adeegsato barahaas loo soo bandhigo warar xiise leh.

Baraha bulshada waa madal wanaagsan oo bulshada lagaga qeybgaliyo doodaha arrimaha taagan. Adeegsiga warbaahintan bulshada waxaa ay aad u sahashay in aad si sahlan u xidhiidhi kartaan adiga iyo dhegeystayaashaada.

★ **Degelka:** Warbaahintaada ma leedahay degel (website)? U samey qorshe ku aaddan sidii aad aqristayaashaada ugu dhiirigelin laheyd in ay bogga ku xidhnaadaan, isla markaasna is waafaji warbixinada xarunta warbaahinta iyo degelka.

★ **Blogging:** Waxa aad soo saari kartaa warbixinno, dhacdooyinka ku sameyn kartaa tebin toos ah iwm adiga oo u adeegsanaya degelkaaga iyo boggaaga Facebook. *(F.G: Blog Tarjumaad looma helin)*

★ **Taleefoon:** Qorshaha ku darso in aad warbixinno u diyaariso dadka isticmaalaya taleefoonada gacanta lagu qaato.

★ **Baraha Bulshada:** Qorshaha ku dar in baraha bulshada sida Facebook iyo Twitter iyo kuwo kale oo badanba in aanad u adeegsan ku gudbinta wararka doorashada oo kaliya, balse aad u adeegsato in ay aqristayaasha ka qeyb qaataan doodaha iyo ra'yi dhiibashada iyo in su'aalahooda looga jawaabo.

## LA SOCO DHAMMAAN DHACDOOYINKA LA SII SHAACIYEY

Wejiga labaad ee qorshahaaga waa in aad isku daydaa in aad sawir guud ka hesho dhammaan dhacdooyinka la sii shaaciyey ama la sii qorsheeyey kuwaas oo dhacaya inta uu ololaha socdo, go'aanna ka gaar kuwa aad diiradda saareyso iyo waxa aad ka soo tebin doonto. Haddii aad fursad u heleyso shaqaaleyso xogheyn ama arday kuu soo uruuriya xogta dhammaan dhacdooyinka siyaasadeed ee la sii shaaciyey, isla mar ahaantaasna ka sameyso dhacdooyinka maalinlaha ah, kaas oo subax walba aroortii hore la diyaarinayo si aad u qorsheysato, adiga oo liiskaa adeegsanaya, sida aad ugu adeegsato shirka tifaftirayaasha ee subaxnimo.

## U DIYAARGAROWGA TEBINTA MAALMAHA MUHIIMKA AH EE DOORASHADA

In la tebiyo maalmahan muhiimka ah ee doorashada waa mid mar walba daal iyo hawl adag wadata, adiga iyo saaxiibadaada shaqada waa in aad sameysataan qorshe hawleed wanaagsan oo ah sida hawshaas loo wajahayo. Ku taagnaw qorshihii aad dejisatay illaa ay dhacaan wax aan caadi aheyn oo qorshaha in la beddelo kugu qasbaya.

Marka aad doorasho ka tebineyso  Somaliland oo kale waa in aad si weyn uga taxadartaa waxa aad ka tebineyso habka farsamo ee codeynta, xasuusnow

mar walba in aad la socoto nidamka tirinta codadka la dhiibtay. Qorshahaaga ku darso in aad wareysato muwaadiniinta caadiga ah iyo odey dhaqameedyada saameynta leh ee kala jooga goballo ama meelo kale duwan, hubi in aad hesho aragtida korjoogayaasha doorashada. Sidoo kale isha ku haya dhaqdhaqaaqa ciidanka amniga iyo isu soo baxyada dadka ay sameynayaan.

Haddii ay dhibaatooyin ka jiraan habka farsamo ee doorashada waa in aad si dhab ah u tebisaa arrintaas masuuliyaddana cilladaha farsamadana wax ka waydiisaa dadka hawsha maamulaya ama masuulka ka ah.

## MAALMAHA MUHIIMKA AH DOORASHADA KADDIB

Ugudanbeyntii, ha hilmaamin in aad ka fikirto maalmaha doorashada ka danbeeya. Waa qalad badanaa ay warfidiyeenka sameeyaan in ay qorsheystaan tebinta doorasho taas oo aanay xisaabta ku darin ama niyad u heyn in ay qorshaha ku daraan maalmaha muhiimka ah ee doorashada ka danbeeya. Laakiin waqtigan ayaa ugu muhiimsan ee la soo dhisayo ama la magacaabayo xubnaha ka mid noqonaya xukuumadda cusub.

Dabcan waa in aad dareen xooggan u lahaataa habka farsamo ee lagu dhisayo dowladda cusub.

Runta!

4

# SUMCADDA WARFIDIYEENKA: RAADI RUNTA MAR WALBA OO NOQO CAADIL DHEXDHEXAAD AH

Xaqiiqdu waa sidan. Xushmee runta oo xushmee xaqa uu dadweynaha u leeyhay in ay runta ogaadaan. Sida uu qabo Ururka Warfidiyeenka Adduunka tani waa waajibka koowaad ee wariyaha.

Runta kama maarmayso in loo tebiyo si lagu kalsoonaan karo. Waa in aad si daacadnimo ku dheehan tahay u soo uruurisaa wararka una tebisaa, tebintaadana waa in aad ku saleysaa xaqiiqda. Ha qarin xog muhiim ah hana marin habaabin. Bulshada ku xidhan warbaahintaada waa inay aamini karaan tebintaada. Haddii aanay tebintaada ku kalsoonaan karin maxay waqtigooda ku lumiyaan dhegeysi, daawashada ama aqriska wararkaaga.

Wariyaha kartida wanaagsan ee tebinta doorashada leh waa ka raadiya oo soo bandhiga fikradaha kala duwan. Taasi haddii la sameeyo waxaa abuur-

maya jawi wadahadallo macne leh. Tani waa u laf dhabar doorasho walba: Waa muhiim in laga doodo caqabadaha dalkeena iyo dadkeena ay wajahayaan iyo waxa ay musharrrixiinta sameyn karaan si ay caqabadahaas uga guul gaadhaan. Waa taa la doonayo in tebinteena doorashada ay iftiimiso.

Ujeedka ugu muhiimsan ee warfidiye xirfadle ahi waa inuu sameeyo tebin wanaagsan oo run, daacadnimo iyo dhexdhexaadnimo ku dhisan. Intan ayaa ah aasaaska salka adag ee soo tebinta doorashada lagu saleynayo.

Sida uu qabo ururka saxafiyiinta adduunka: “Wariyahu waa in uu mar walba u taagnaadaa difaacidda xaqa ah in wax la dhaliili karo.” War tebintaadu waxaa ay lumineysaa kalsoonida haddii ay noqoto mid hal dhinac uun fursad u siineysa in uu ku weeraro dhinacyada ay siyaasadda isaga soo horjeedaan. Dhinicii warbaahintaada lagu weeraray waa in mar walba si shuruud la’aan ah loo siiyaa fursad ay kaga jawaabto eedaha loo jeediyey.

Xasuusnow mar walba in wariyaha wanaagsan ay dhegeystayaasha/daawadayaasha/aqrisyayaasha ku xidhan dareensiiyaa in uu u hayo war muhiim ah. Dadka kugu xidhan waa in ay dareemaan muhiimadda warka aad uga soo tebineyso doorashada. Warbaahinta casrigan waa mid wax naqdisa oo aad isu hawsha – laakiin mar walba waa mid xirfad sare iyo heer wanaagsan oo dhexdhexaadnimo ah ku saleysan.

In aad raadiso war tebin dheelli tiran macnaheeda ma ahan in aad mar walba ku qasban tahay in ilaha oo dhan la siiyo fursad siman war walba. Sida caadiga ah xisbiyada xoogga leh ama guuleystay ayaa diiradda loo saaraa. Sida ay u kala xooggan yihiin ayey dareenka warbaahinta u soo jiitaan. Hase ahaatee waa in aan la hilmaamin oo doorkooda la siiyaa kooxo gaar ah oo bulshada ka mid ah sida dadka laga tirade badan yahay iyo qeybaha bulshada ee aan badanaa helin fursan ay codkooda ugu bandhigtaan bulshada dhexdeeda.

Marka ay doorashada dhammaato oo aad qiimeyn ku sameyneyso sida aad u tebiseen waa in qiimeynta ay ku soo baxdaa in dhammaan jilayaashii muhiimka ahaa ee siyaasadda, dadweynaha iyo dadka aan codkooda la maqlin ay dhammaan codkooda la tebiyey.

## SIDEE LOOGU SUGNAADAA SINNAAN IYO DHEXDHEXAADNIMO?

Talo soo jeedintan soo socota ee sida sinnaanta iyo dhexdhexaadnimada loo ilaaliyo xilliga ololayaasha doorashada waxaa isku raacay Guddiga khubarada Afrika ee tebinta doorashooyinka, kuwaas oo 2012-kii hay’adda IMS ay shir ugu qabatay Dalka Ghana.

★ **Daacadnimo:** Noqo daacad. Runta sheeg ama wax aad ku kalsoon tahay runnimadooda.

★ **Dhexdhexaadnimo:** Dhammaan dhinacyada siyaasadda, siyaasiyiinta iyo bulshada, waa in ay fursad ka helaan warbaahintaada. Iska jir in aad hal xisbi siyaasadeed dhiniciisa uun aad warka ka soo tebiso. Dhexdhexaad noqo oo dhammaan fikradaha waa in ay ka muuqdaan war tebinta warbaahintaada.

★ **Sinnaan:** Ula dhaqan dhammaan siyaasiinta musharrrixiinta ah si siman, xasuusnow in mar walba qofka lagu weeraray warbaahintaada ama dhaliil adag loogu jeedinyey in la siiyo fursad uu ku kaga jawaabo weerarka ama dhaliisha. Ilaalinta sinnaantu waa in si daacadnimo ah loo tebiyo barnaamijyadooda siyaasadeed ee ay ku ololaynayaan, balse waa in aadan noqon mid mokrofoonka uun u haya, waxa ay masuuliyad kaa saran tahay in aad weydiiso su’aalo matalaya baahiyaha dadweynaha, fikrahadana su’aal gelisid.  Muhiim ma aha in aanad aaminsaneyn musharraxa, ujeedadu waa inaad musharraxa siisid fursad uu dooddiisa ku difaaci karo si uu dadka u fahamsiiyo.

★ **Caddaalad:** Samee wax walba si aad caddaalad ugu sugnaato. Doorashada ku tebi afka musharrrixiinta haddii aanay gudbineyn farriimo naceyb iyo rabshad abuur xambaarsan, waana in aad xogaha rasmiga ay fikradaha marka aad xigasho sameyneyso. Xasuusow in xigashooyinka aad geliso calaamadaha xigashada sida “ ”, kaddibna qofka hadalka yidhi magiciisa dhig dabadeedna calaamadda danbe.

★ **Xog sugan:** Ha tebin war suuqeed, hubi eedaha la isu jeedinayo iwm. Ha kala dooran xogaha sugan ama mid gooni ha u xulan, u tixgelin xogta sugan dhinacyada oo dhan si hufan.

## SIDEE LOOGU SUGNAADAA SINNAAN IYO DHEXDHEXAADNIMO?

★ **Madaxbanaani:** Iska fogey sheeko wareedda aad tebineyso oo yaaney meelna kaga jirin fikirkaaga iyo dareenkaaga, noqo qof aan dhanna la jirin oo dhinacyada oo dhan ka madaxbanaan. Marna si cad ha u sheegan in aad taageersan tahay siyaasi gaar ah. Caadiyan waad codeyn kartaa adiga oo saxafi ah, waanad yeelan kartaa xisbi aad taageersan tahay, laakiin waa in aad leedahay aragti fog oo xirfadeed. Ha hilmaamin tebinta wararka doorashada ee muhiimka u ah dadka oo dhan ama qeyb ka mid ah cod bixiyeyaasha. Waa in aad meesha ka saartaa in fikirkaaga aad ku sheegto tebinta doorashada, marna ha yeelin sidaas.

★ **Masuuliyad:** Ka fikir cawaaqibta ka dhalan karta war tebintaada. Is weydii habka war tebinteyda miyey naceyb bulshada ka dhex abuurayaa? Habka war tebinteyda dhibaato miyey ka imaneysa mu-waadiniinta fikirkooda dhiibanaya? Haddii ay jawaabtu noqoto haa war-bixintaas jooji oo ha siideyn.

# 5 RAAC HABRAACYADDA XIRFADDA EE LA ISLA OGOL YAHAY

Wariyaha xirfadlaha ah waxaa uu ku shaqeeyaa habraacyada ay dunida isla ogoshahay ee wariyenimada, kaas oo ku saleysan in wariyaha mar walba gor-gortan la’aan u raadiyo runta si uu tebintiisa ugu saleeyo, mana noqdo aalad uu ku adeegto qof ujeeddooyin siyaasadeed oo gaar ah leh. In kastoo war-baahinta qudheeda ay noqon karto mid hadaf siyaasadeed leh haddana taas meesha kama saareyso in wariyaha laga filanayo in uu si xirfadle ah u dhaqmo runta kaliyana tebiyo.

Laakiin ha kuu kala saarnaadaan runta iyo warka muhiimadiisu, taas oo aad adeegsaneyso marka aad go’aan ka gaadheysid in uu mudan yahay in la sii daayo in la iska dhaafo.

## ADEEGSO HAB AAD MUHIIMAD KU KALA SIINEYSO WARKA, SI AAD U QIIMEYSO IN WARKA DOORASHADA LA XIDHIIDHA MUDAN YAHAY IN LA SIIDAAYO IYO IN KALE.

Marka aad olole doorasho tebineyso waa in aad maanka ku heysaa ahmiyada-han soo socda, si aad u go'aansato in sheeko wareedka ay astaahisho in la sii deyn karo. Haddii sheeko wareed la xidhiidha ololaha doorashada ay buuxin weydoo ugu yaraan labo ka mid ah shuruudahan muhiimka ah ee hoos ku qoran iska daa, waqti ha gelin.

★ **MUHIIM**
Wax walba oo dhaqaaqa ha daba ordin. Ka taxadar sheekooyinka aad xu-laneyso. Ujeedkaaga koowaad ka dhig in aad tebineyso sheeko wareedyo doorashada khuseeya kuwaas oo muhiim ah isla markaana ahmiyad aasaasi ah u leh Somaliland. Dhinaca kale, ka taxadar in aad muhiimadda wararka ka eegto hadba sida ay u aragto dowladda iyo inta talada dalka gacanta ku hey-so. Muhiimadda sheeko wareedku waa in ay xidhiidh la leedahay arrimaha ku xeeran nolol maalmeedka muwaadiniinta caadiga ah, war tebintaaduna waa in ay iyaga meteshaa.

★ **SAAMEYN**
Dadku badanaa sheeko wareedyada doorashooyinka waxay ka eegaan saameynta ay ku leeyihiin nolol maalmeedkooda, sida wararka la xidhiidha ammaankooda shaqsiga ah, badqabka, caafimaadka, biyaha, nadaafadda, wax-barashada, iwm. Arrimahan saameyntooda ayaad toos u taabaneysa dadka.

★ **XASAASI**
Wararka xasaasiga ah ayey dhegeystayaashu daneeyaan badanaa, balse waa in ay kuu kala soocnaadaan war xasaasi ah oo aan macne laheyn sida nolosha gaarka ah ee siyaasi iyo war xasaasi ah oo macne weyn leh sida dhacdooyin muhiim ah iyo xaalad dadka muhiim u ah sida horumarka.

★ **ISKU XIDH**
Waxay u fududeyneysa cod bixiyeyaasha in ay fahmaan doorasho xaalkeedu murugsan yahay haddii wararka dadka laga soo xiganayo ee ka sheekeynaya ay yihiin muwaadiniin caadi ah iyo sida ay u saameysay tebinta doorashadu. Tani waxaa ay u sahleysaa dhegeystayaashaada in ay sheeko wareedda doorashada aad ka tebineyso iska dhex helaan.

★ **TEBIN WAX DHISEYSA**

Bulshooyinka dagaalada soo maray sida Soomaaliland oo kale waxaa loo baahan yahay in war tebinta doorashada laga eego dhanka wax dhiseysa oo kaliya. Warar la xidhiidha wax dhisidda Somaliland iyo dadka sameynaya wax yaabaha ay uga danleeyihiin in ay xaaladda ku hagaajiyaan. Haddii si fudud loo dhigo waa in tebinta warbixinada Soomaalida kale ku dhiirigelin kara in ay ka qeyb qaataan wax dhisidda iyo xal raadinta.

## WAYDII SU'AALO OO LA DOOD SIYAASIINTA

★ Xusuuso in aad mataleyso dadweynaha sidaa darteed su'aalaha aad weydiineyso siyaasiintu waa in ay ka tarjumaan aragtida dadweynaha

★ Dood ku geli siyaasiinta arrimaha la taaban karo ee taagan, adiga oo weydiinaya su'aalo fudud sida

***"Sidee ayaad ku fulineysaa arrintan?"***
***"Maxaa ka dhigay muhiim?"***
***"Halkee dhaqaale uga keeneysaa?"***

★ Si taxadar badan u dhegeyso jawaababaha siyaasiinta, kana weydii su'aalo ku habboon jawaabta ay bixiyeen haddii aanay si hufan uga jawaabeyn su'aashii hore.



## ADEEGSO KHUBARO MADAXBANAAN SI AAD FASIRAAD UGU HESHO SHEEGASHOOYINKA SIYAASIINTA

Khubarada waxaa ay noqon karaan tusaale ahaan Jaamacada, ururada cilmi baadhista sameeya, kuwaas oo si cilmiyeysan kaagaga jawaabaya ama kuugu taxliilinaya su'aalaha ka dhalan kara warsaxaafadeedyada siyaasiinta.

★ Khubarada waxaa ay warkaagii u sameyn karaa in uu yeesho aragti.

★ Khubarada waxaa ay qiimeyn kuugu sameyn karaan haddii warsaxaafadeedka siyaasadeed uu yahay mid run ah, xaqiiqda u dhow, sharcigana waafaqsan.

★ Khubarada waxaa ay dheelli tiri karaan sheeko wareedkaaga.

★ Aad u taxadar marka aad qof khabiir ah wareysaneyso: Qofka khabiirka ahi waa in uu yahay qof madaxbanaan oo aan ka tirsaneyn xisbi siyaasadeed la wada og yahay, waana in aanu laheyn ujeeddo gaar ah.

## WARIYEYAASHA XIRFADLAYAASHA AH MA AHA OO KALIYA XASUUS QORAYAAL– WAR AYEY TEBIYAAN

★ Kaliya mokrofoonka ha u heyn siyaasiinta hadleysa, hana ku soo celin dhammaan wixii uu musharraxa yidhi oo dhan, uma tihid xasuus qore. Waad kala xulaneysaa, waad tifaftireysaa wararka adiga oo waafajinaya qiimaha iyo muhiimadda war ahaaneed iyo saameynta uu ku leeyahay dhegeystayaashaada.

★ Ku xus warka meesha warkan lagu bixiyey, sida uu yahay falcelinta dadweynaha iyo fikradaha dadka ka soo horjeeda cidda warka bixisay iyo khubarada madaxbanaan.

### WARKA SIYAASADDA KA DHIG WAX LA FAHMI KARO

- ★ Sida ay u qoreen ha u qaadan oo ha u siideyn warsaxaafadeedyada siyaasiinta, kaas oo ay ku soo dhiseen warka sidii ay u rabeen iyo luuqaddii ay u doonayeen in lagu sheego.
- ★ Ka raadi xagal wareedka ugu macquulsan kaasna ku dhis warkaaga.
- ★ Haddii ay suurtogal tahay warkaaga ku dhis cawaaqibka ka dhalan kara warsaxaafadeedka siyaasadeed.
- ★ Warka ku sheeg luuqad fudud oo naxwaheeda dhisan yahay iyada oo aanad saameyn luuqadeed ku yeelaneyn ishii warka uu ka yimid.

# 6 SIDA LOO XAKAMEEYO HADALLADA NACEYBKA IYO RABSHAD ABUURKA KU SALEYSAN

Adeegsiga luuqad xaalad abuur ah waa midda ugu badan ee dagaalada u sabab ah. Hal erey oo qaladan ama hal sawir ayaa sabab u noqon kara in uu dab holco oo rabshado iyo jahwareer dhacaan. Luuqadda iyo sawirada waa aalado xoog badan marka ay timaaddo war tebin, waa in loo adeegsadaa si aad u taxadar badan oo wacyi iyo aqoon ku saleysan.

Fikir inta aadan hadlin ama wax qorin – adeegso xeer ka mid ah kuwa ugu muhiinsan xeerarka war tebinta: U dhegeyso ilo wareedyada iyo musharrrixiinta siyaasadeed si furan oo ka madax banaan malahaaga. Qofka marka aad dhegeysaneyso haku miisaamin waxa aad ka aaminsan tahay, dhageyso waxa uu kuu sheegayo, dhegeyso macnaha ka danbeeya ereyada uu ku hadlayo ama ay ku hadleyso. Inta badan waxaa gacan ka hadal dhaliya marka ay kooxi dareemeyso in aan codkeeda la maqlin.

## EREYADEENA AYAA WAX DILI KARA – KA TAXADAR

Wariye ahaan waa in aad noqotaa qof aad u feejigan oo ka tadaxar qaba luuqada aad adeegsaneyso waligaa ha isku dayin in aad qof ku xadgudubto ama dhibaateyso.

Sawirada waxaa ay badanaa leeyihiin saameyn ka xoog badan tan ereyada la adeegsado, sawir gacmeedyadana waa sida kiniinka qallajiye ah oo xididdada dhiigga toos u abbaaraya – saameyn deg deg ah ayey leeyihiin. Ka taxadar marka aad daabaceyso sawir gacameed ama sawir caadi ah oo loola jeedo in qof lagu weeraro – gaar ahaanna haddii arrinkaasi la xidhiidho dhaqan, diin, qabiil ama hayb.

Qeyb ka mid ah si xun u adeegsiga hadallada rabshad abuurka ah waxaa ay noqoneysaa naceyb abuurid, taad oo xadgudub ku ah qof ama koox dad ah oo lagu maagayo heybtooda, midabka jidhkooda, jinsigooda, laxaadkooda oo dhiman, haybtooda, caqiiddadooda ama arrimo kale. Hadallada naceybka xanbaarsani waa dhihidda hadallo si toos ah loogu beegsanayo qof ama koox dad gaar ah.

Taariikhda dhaw ee Afrika waxaa ay dhigeysaa tusaalooyin dhawr ah oo naxdin leh kuwaas oo hadallo naceyb ku saleysan oo loo adeegsaday warbaahinta ay dhaliyeen rabshado aad u foolxun. Ogow wariye walba waxaa saaran masuuliyad weyn oo ah in uu iska jiro hadallada naceybka abuuraya. Cudurdaar kuuma noqoneyso in hadalka aad qof ka soo xigatay, waa masuuliyaddaada in aadan siideyn hadal naceyb xanbaarsan oo uu qof jeediyey. Haddii il wareed ay adeegsato hadallo naceyb xanbaarsan ama rabshad abuur ah si taxadar leh adiga oo ula tashanaayo tifaftiraha go'aan ka gaadh haddii uu hadalkaas mudan yahay in aad sii deyso iyo in kale.

## XAQEENA AH EE XORRIYATUL QAWLKA NOOMA OGOLAANAYO IN AAN WAX WALBA KU HADALNO

Haddii aan nahay warfidiyeenka waxa aan badanaa ku dhib qabnaa fahamka xoriyatul qawlka anaga oo u heysana in ay la macne tahay in aan wax walba u odhan karno si toos ah ama si xigasho ah. Laakiin si ka duwan xorriyadda fikirka xoriyatul qawlku ma aha mid bilaa xuduud ah. Adeegsiga xoriyatul qawlka waxaa la socda waajibaad iyo masuuliyado dhawr ah, waana ay xadidan tahay marka ay timaaddo difaaca xaquuqda dadka kale.

Tani waxaa ay ka dhigan yahay wariye walba ee xirfaddiisa ku adag ma faafiyo hadallo ama warar xanbaarsan, u cudurdaaraya ama dhiirrigelinaya naceyb ku saleysan diin, qabiil ama heyb.

Warfidiyeen ahaan waa in aan la soconnaa in fikradaha naceybka xambaarsan ay saameyntooda sii xun tahay ama dhibaato ballaadhan geysan karaan marka lagu faafiyo warbaahinta.

Sidaas darteed waa muhiim in aad ku baraarugsan tahay farqiga u dhexeeya masuuliyadda qofka qoray "Fikirka naceybka" xanbaarsan iyo tan warbaahinta ka saaran in ay faafiyaan hadallo naceyb ku saleysan.

Xeerarka anshaxa saxaafadda waxaa ay mar walba saxafiga barayaan in aanu faafin naceyb iyo in aanu adeegsan luuqad rabshad abuuri karta. Laakiin haddii wariye khibrad leh – iyada oo la eegayo danta dadweynaha – u arko lama huraan in la siidaayo hadal naceyb ku saleysan waa in la raaciyo oo la helaa fikrado dheelli tira oo qofka hadalka naceybka ku saleysan jeediyey siinaya jawaab adag ama hadalkiisa su'aal gelinaya.

## MAXAAD SAMEYNAYSAA MARKA AAD LA KULANTO HADALLO NACEYB XAMBAARSAN?

Talo soo jeedintan soo socota ee sida loolla dhaqmo hadallada naceybka iyo rabshad abuurka ku saleysan xilliga ololayaasha doorashada waxaa isku raacay Guddiga khubarada Afrika ee tebinta doorashooyinka, kuwaas oo 2012-kii hay'adda IMS ay shir ugu qabatay Dalka Ghana:

★ **Hadallada naceybka wata:** ka fogow in aad qeyb ka noqoto olole ka dhan ah koox dad ah ama qeybaha laga tirada badan yahay ee bulsada ka mid ah, hana adeegsan sarbeebyo ama maahmaahyo si gaar ah aflagaaddo ugu ah qeyb bulshada ka mid ah.

★ **Aflagaaddo:** Ha adeegsan erey-bixinno aflagaaddo ah ama calaamado iyo summado caay ah. Haddii aad xiganeyso hadal kulul oo ka soo baxay siyaasi mid kale wax ka sheegaya ha sii deyn warka illaa aad siyaasigii wax laga sheegay hordhigto weerarka afka ah ee lagu qaaday kaddibna hesho jawaabtiisa – hubi in xigashooyinka aad si hufan u dhigtay.

★ **Sawirro iyo codad xaalad abuur ah:** ka fogow fiidiyowyada, sawirada, sawir-gacmeedyada iyo codadka loogu talo galay in dhibaato lagu abuuro.

- ★ **Dabeecad & luuqad aan degganeyn:** In aad leedahay dabeecad yara kulul waa caadi shaqsi ahaan iyo saxafi ahaanba, laakiin noqo qof ilbax ah: Ha ooyin oo ha qaylin, hana sameyn farogelin aan habbooneyn. Iska ilaali in magacyo xun aad qof ugu yeedho.

- ★ **Weeraridda inta laga tirada badan yahay:** Ka fogow naceybka heybta ku saleysan iyo in aad bulsho laga tiro badan yahay afkaaga aad ku weerarto, sida beelaha laga tirade badan tahay, dadka ajaaniinbta ah, iyo dhammaan qeybaha kale ee bulshada ee laga tiro badan yahay. Ha ugu yeedhin magacyo xun xun dadka heybaha kale ah, ha ka aaminin wax aan jirin, ha sameyn heyb sooc iyo sumcad dil midna.

- ★ **Jinsiga:** Iska ilaali jinsi-sooca, haku soocin qof sabab la xidhiidha lab iyo dhedig waxa uu yahay, ha adeegsan luuqad labka ama dhedigga lagu xaqirayo. Ha ula dhaqmin haweenka si ka duwan ragga.

- ★ **Faafin warsuuqeed:** Ka digtoonow in aad faafiso warsuuqeed. Mar walba xaqiiji xogta iyo macluumaadka ku jira, haddii ay kuu suurto galeyso ka xaqiiji labo ilo wareed oo kala madax banaan.

# 7 ANSHAXA TEBINTA DOORASHADA

Anshax waxaa uu la xidhiidha xulashadaada wariyenimo.

Nasiib darrooyinka ugu weyn ee la xidhiidha anshaxa warfaafinta waa in aad farageliso arrimaha hoose ee dadka ama siyaasiinta. Waxaa suurto gal ah in sharciga uu kuu ogol yahay in aad arrin tebiso, balse damiirkuna ma kuu ogolaanayaa? Tani waa su'aasha laf dhabarka u ah tebinta anshaxa ku dhisan. Anshax waxaa uu la xidhiidha xulashada aad sameyneyso ka wariye ahaan: Ma tebineyaa waxan mise waad iska deyneysaa?

Nasiib darrooyinka anshaxa saxaafadda kuwooda ugu daran waxaa ay dhacaan xilliyada doorashooyinka, xilligaa oo siyaasiinta iska soo horjeedda midba midka kale in uu sumcad dilo isku dayayo, dacaayad ayey iska fidinayaan, arrimahooda hoose ayey galayaan, mararka qaarna sheekooyin been ah ayey iska abuurayaan.

Waxaa jira go'aan sax ah oo dhif ah. Tifaftirayaasha iyo wariyeyaasha mararka qaar isku si arrimaha uma arkaan, laakiin xeer wax hago in la raaco ayaa keeni karta go'aanka wanaagsan.

**Marka kaliya ee aad faafineyso siraha siyaasiinta iyo hogaamiyeyaasha waa marka waxa uu qofkaasi sameeyey ay saameyn xun ku leeyihiin shaqada uu bulshada u hayo ama ay u heyso.**

Waa in aad og tahay heerkaaga anshaxa: Isweydii maxaad faafineysaa, maxaadan faafineyn? Ma waxaad faafineysaa war aad og tahay in uu been yahay ama buunbuunin badani ku jirto? Dabcan maya, haddii aad sidaas sameyso waxaad noqoneysaa khaa'in damiir laawi ah.

# 8 DEJINTA QODOBO HAGA HAWLWADEENADA SOO TEBINAYA DOORASHOOYINKA

Haddii aanay warbaahintaadu laheyn qodobo diyaarsan oo haga hab dhaqanka wariyeyaasha xilliga ay socdaan ololayaasha iyo soo tebinta doorashada waa inay tifaftirayaasha sameeyaan sida soo socota:

- ★ Deji qodobo lagu qaado wariyihii aqbalay lacag ama hadiyad siyaasi uu bixiyey ama musharrax: Xeerka guud ee saxaafaddu waa in aan la aqbalin.

- ★ Deji qodobo xaddidaya in wariyeyaasha iyo tifaftirayaasha ay siyaasi u ololeeyaan: Guud ahaan wariyeyaasha tebinaya doorashada uma ololayn karaan siyaasi, xitaa iyaga oo xaq u leh in ay xisbi ku biiraan ama codeeyaan.



# 9

# BADQABKA WARFIDIYEENKA TEBINAYA DOORASHOOYINKA

Suxufiyininta waxay wajahan waxyaabo badan xiliyadda xasaasiga siida doorashooyinka.

- ★ Halista ay wariyeyaasha wajahayaan way korodhaa
- ★ Madaxbanaanida warbaahinta iyo xoriyatul qawlka ayaa halis galaya.
- ★ Xidhitaanka xarumaha warbaahinta iyo xadhiga wariyeyaasha ayaa kordha.

Waxaa jira werwer ah in doorashada 2017 ay horseeddo in ay kordhaan xadgudubyada ka dhanka ah wariyeyaasha iyo warbaahinta. Ololayaasha iyo murannada u dhexeeya kooxaha siyaasadeed iyo musharrrixiinta ayaa abuuri kara xasaasiyad kordhisa halista wariyeyaasha.

## HALISTA

Wariyeyaasha aan dhawrin annshaxa iyo xeerarka saxaafadda – sida kuwa tebiya wararka been abuurka iyo naceybka ku dhisan ama u ololeeya musharrax gaar ah – waxay abuurtaa cadaawad wuxuuna naftiisa, warbaahintiisa iyo asxaabta ay isla shaqeeyaan geliyaa halis.

## SIDA LOO YAREYN KARO HALISTA

★ **ADEEGSO HAGAYAASHA BADQABKA**

Hagaha badqabka waxaa ku qoran qodobo haddii la adeegsado lagu yareyn karo halista. Ma jiraan buugaag si gaar ah uga jawaabaya baahiyaha talo ee saxafiyiinta Somaliland, laakiin Guddiga Daryeelka Saxafiyiinta ee CPJ ayaa hagaheeda loogu talo galay wariyeyaasha dunida lagu tarjumay af Soomaali, waxaana laga heli karaa mareegtan hoose.
Hubi aqriso halkan *https://cpj.org/reports/cpj_security_guide-somali.pdf*

★ **QIIMEYNTA HALISTA IYO MAAREYNTEEDA**

Waxaa muhiim ah in madaxda warbaahinta loo diyaariyo sidii ay halista u qiimeyn lahaayeen inta aanay koox shaqaale ah meel ugu dirin hawl. Waa in ay sidoo kale yeeshaan awood ay kaga jawaabaan haddii ay dhacaan dhibaatooyin saameeya shaqaalahooda ama xarumahooda.

★ **KA HORTAG IYO GURMAD**

Tababar wariyeyaasha warka ka soo tebinaya goobaha halista ah si ay u helaan xirfad ku filan oo ay isku badbaadin karaan sida gargaarka degdegga, buug yare talooyin ku qoran yihiin, adeegsiga agabka lagu xidiidho, hab dhaqanka goobaha halista ah iyo taageero caafimaad haddii loo baahdo.

★ **TIXGELI JINSIGA:**

Diyaari qodobo ay ku cad yihiin tallaabooyin xaqiijinaya sida loo daryeelayo arrimaha xasaasiga ah ee jinsiga la xidhiidha si ay suurto gal u noqoto inay haweenku ay ka qeyb gali karaan hawlaha war raadinta iyaga oo aan lagu xadgudbeyn, taas oo fursad siin karta in haweenka codkooda la maqlo.

# HAGAHA WARFIDIYEENKA EE TEBINTA DOORASHOOYINKA SOOMAALILAND 2017

★

## WARIYE, XASUUSNOW

★ **Anshaxa:** ilaali anshaxa iyo shuruucda hab dhaqanka toosan ee war tebinta. Haddii aanad ku dhaqmin anshaxa iyo mabaadiida aasaasia ah ee saxaafadda waxaad halis u nugushahay in aad dhan u xagliso ama war tebin qaldan samey-so taas oo halis gelin karta naftaada, warbaahintaada iyo asxaabta aad isla shaqeysaan.

★ **Runta:** Mar walba raadi runta iyo waxa aad si weyn u aaminsan tahay run ahaan-shahooda, macluumaad run ah kaliya tebi.

★ **Ogow bulshada ayaad u adeegeysa:** Xasuusi naftaada in doorasho macnaheedi yahay siyaasad, ereyga siyaasad waxaa uu asalkiisa ka soo jeedaa afka Giriiga, waxaana loola jeedaa 'Danta dadka'. Tebintaada doorashada waa in ay mar wal-ba ka tarjuntaa danta dadweynaha.

*Buuggan iyo tilmaamaha ku qoran waxaa diyaariyey mashruuca horumarinta warbaahinta Soomaaliyeed ee iska kaashanayaan hay'adaha International Media Support (IMS) iyo FOJO Media Instutite oo kaashaday hay'adaha warbaahinta Soomaaliyeed.*

*Buuggan waxaa si wada jir u qoray islana tifaftiray Henrik Keith Hansen oo ah khabiir dhanka warbaahinta iyo tebinta doorashooyinka iyo Abukar Albadri oo ah Xidhiidhiyaha Barnaamijaka Horumarinta Warbaahinta Soomaliyeed ee IMS-Fojo iyo Khaled Ismail Abdi oo ah Wakiilka IMS-Fojo ee Somaliland.*

*Sawirka bogga hore: Alamy Stock Photo*
*Design: www.kochfalk.dk*

ims INTERNATIONAL MEDIA SUPPORT

**IMS** waa urur caalami ah oo warbaahinta horumariya, kaas oo warbaahinta gudaha ka caawiya sidii ay u yareyn laheyd xasaradaha, u adkeyn laheyd dimoqraadiyadda, una fududeyn laheyd dood wadaag.
https://www.facebook.com/IMSFojoSomalia/
https://www.mediasupport.org/

FOJO:MEDIA INSTITUTE Linnæus University

**FOJO** waa xarun ku taalla Iswiidhan oo warbaahinta horumarisa
https://fojo.se/

EMBASSY OF SWEDEN
Nairobi

Daabacaadda buuggan waxaa suurto gelisay taageero ay fidisay dowladda Iswiidhan